Codsashada Qadada Bilaashka ah ama Qadada Qiima dhiman ee Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus

Gal kootadaada Xiriirka Waalidka ee Infinite Campus.
Guji "More” (In ka badan) oo kadibna guji "Meal Benefits” (Faa'iidooyinka Cuntada).



Guji si aad u bilowda habka codsiga.



Guji "Yes” (Haa) si aad u abuurto lanbar sireedka (PIN) saxiixa elektarooniga ah.



Samee lanbar sireed ka kooban 5 xaraf ama lanbar ama xarfo gaar ah. Lanbar sireedku waa inay ku jiraan ugu yaraan hal xaraf iyo hal lanbar. Geli lanbar sireedka (PIN) aad dooratey labo jeer kadibna geli eray sireedka kootadaada Xiriirka Waalidka. Guji "Submit" (Gudbi).

Codsigu wuu furmi doonaa. Qaybaha codsigu kor ayay ka muuqdaan, marka aad dhamaysaba cagaar ayay isku bedeli doonaan. Raac tilmaamaha ku qoran qaybta sare ee bogga, kadibna guji "Next" (Xiga) si aad usii wado.

Waxaad haysataa 60 daqiiqo oo aad ku dhamaystiri karto qayb kasta. Hadii aadan qaybta buuxin kahor intaad wakhtigu dhamaan, codsigu wuu xirmayaa oo waa inaad markale bilowdo.



Sax sanduuqa qof kasta ee weli guriga ku nool.
Hadii ay jiraan dad liiska ka maqan, guji "Add Household Member" (Ku dar xubin qoyska ah) si aad iyaga ugu darto



Mararka qaar, su'aalo dheeraad ah ayaa soo bixi kara. Ka jawaab wixii lagu waydiiyo.



Khaanada ciyaalka, sax sanduuqa cunug kasta ee ku nool guriga kuwaas oo ay da'doodu tahay 18 iyo wixii ka yar.



Sax sanduuqa qof kasta ee aan shaqaynin ee guriga ku nool. Guji "Add Income" (Ku dar Dakhli) dadka dakhligu soo galo.



Geli cadadka nooc kasta oo ka mid ah dakhliga iyo inta jeer ee lacagtaas la qaato.



Dhamaystir dhamaan qaybaha ku qoran khasnada ogolaanshaha adigoo gujinaya "yes" (haa) ama "no" (maya). Buuxi sanduuqyada kale oo guji "Accept" (Aqbal).



Geli lanbar sireedka saxiixaaga elektaroonniga ah ee horay usoo samaysay oo guji "Submit" (Gudbi).